



NEBRASKA
DEPARTMENT OF EDUCATION

Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah (Office of Special Education) Hagaha Dhexdhexaadinta

Waa maxay dhexdhexaadin?

Dhexdhexaadintu waa geedi-socod is-xilqaam ah, qarsoodi ah, oo mushkilad lagu xalliyo oo kor u qaada wada xidhiidhka ixtiraamka ah iyo wax dhisida leh ee ka dhexeeya laba qof ama in ka badan oo isku dhacay. Dhinac kasta waxaa la siinayaa fursad uu ku sharraxo sida uu wax u arko, halka dhinaca kalena uu dhegaysanayo. Liiska arrimaha la isku khilaafsan yahay ayaa la sameeyaa oo midba mar ayaa wax laga qabtaa. Xalalka arrin kasta ayay dhinacyadu sahmiyaan. Marka la helo xalal ay ku qancaan labada dhinacba, heshiis ayaa la qoraa.

Waa maxay noocyada arrimaha waxbarashada gaarka ah ee dhexdhexaadinta u baahan kara?

Khilaafaadka khuseeya aqoonsiga, qiimaynta, meelaynta waxbarasho, ama bixinta waxbarashada guud oo bilaash ah oo ku habboon dhallaanka, socod-baradka, iyo carruurta naafada ah (da'da dhalashada – 21 jir).

Kharash intee le'eg ayaa ku baxa dhexdhexaadinta?

Waaxda Waxbarashada ee Nebraska (Nebraska Department of Education) waxay qandaraas la gashay xarumaha dhexdhexaadinta ee aan faa'iido-doонка ahayn si ay adeegyo ugu siiyaan dhinacyada si lacag la'aan ah.

Waa ayo dhexdhexaadiyeyaashu?

Dhexdhexaadiyeyaashu waa xeeldheereyaal tababar, oo xidhiidh la leh mid ka mid ka mid ah lixda xarumood ee daawaynta ee aan faa'iido-doонка ahayn, waxaana ansixiya Xafiiska Xallinta Khilaafaadka ee Nebraska (Nebraska Office of Dispute Resolution). Dhexdhexaadiyayaashu waxay isku dayaan inay caawiyaaan dhinacyada si ay u gaadhaan xal la wada aqbali karo oo khilaafkooda ah.



NEBRASKA DEPARTMENT OF EDUCATION

Dhexdhexaadiyeashu waa kuwo caaddil ah, dhexdhexaad ah, oo xagaani ah, oo wax go'aan ah aan u gaaraan dhinacyada. Dhexdhexaadiyeashu ma bixyaan talo shariyed ama la-talin. Dhexdhexaadiyeashu kama socdaan Waaxda Waxbarashada ee Nebraska.

Maxay dhexdhexaadiyeashu ka garanayaan waxbarashada gaarka ah?

Dhexdhexaadiyeashu waa xirfadlayaal tababar, oo aqoon u leh fududeynta wadahadalka wax-ku-oolka ah ee wax looga qabto khilaafaadka. In kastoo ay haystaan tababar gaar ah oo khuseeya dhexdhexaadinta arrimaha waxbarashada gaarka ah, ma ahan khabiro ku takhasusay waxbarashada gaarka ah lafteeda. Haddii loo baahdo khibrad gaar ah, dhexdhexaadiyeashu aaya kaala shaqayn doono inaad hesho ikhtiyaaro ama fursado lagu soo kordhinayo khibradda lagama maarmaanka u ah doodaha.

Ka waran haddii aan jeclaysan heshiiska?

Heshiis ma dhici doono inaad si ikhtiyaari ah u aqbasho mooyaane. Dhinacyadu mas'uuliyad ayaa ka saaran inay muujiyaan ra'yigooda inta lagu gudajiro kulanka dhexdhexaadinta. Dhexdhexaadiyeashu waa kuwo xirfad u leh maaraynta arrimo kala duwan iyo ka caawiya dadku inay gartaan waxa ay dhab ahaantii rabaan. Heshiisyadu waxaa la gaaraa iyadoo loo marayo geedi-socod xooggan; iyadoo la qaadayo tallaabooyin tiro beel ah oo lagu xaqiijinayo in dhinacyada oo dhan ay dhab ahaantii ku qanacsan yihii in arrimahooda iyo danahooda la daboolay. Kuwa oggolaaday inay dhexdhexaadiyaan waxay leeyihiin ixtimaalka aad u sarreyya ee xallinta.

Sidee ayay dhexdhexaadintu inoo caawin kartaa?

Dhexdhexaadintu waxay siisaa kaqaybqaateyaasha oo dhan fursado loo wada siman yahay oo lagu xalliyo dhibaatooyinkooda iyagoo la gaarayo heshiis ka turjumayo danaha ugu fiican ee waxbarasho ee ilmaha. Haddii aan heshiis la gaarin, weli waxaad gudbin kartaa cabasho gobol, waxaad codsan kartaa dacwad dhageysi caddaaladeed, ama dhexdhexaadin ayaad isku dayi kartaa wakhti kale.



NEBRASKA

DEPARTMENT OF EDUCATION

Ikhtiyaarka Dhedhexaadintu waa...

IS-XILQAAM - Ikhtiyaar ayay u leeyihiiin dhammaan dhinacyada.

QARSOODI – Waa dood furan oo goob gaar ah lagu qabto. Dhammaan wadaxidhiidhada la sameeyo inta lagu gudajiro dhedhexaadinta waa qarsoodi mana la shaacin karo ilaa ay ku heshiyaan dhinacyadu mooyaane. Marka la qorsheeyo kulanka dhedhexaadinta, dhammaan kaqaybqaayeyaasha ayaa laga codsan doonaa inay saxiixaan foomka oggolaanshaha.

KHARASH LAGAMA RABO DHINACDYADA – Waaxda Waxbarashada ee Nebraska ayaa bixisa kharashaadka la xidhiidha dhedhexaadinta. Dhinacyadu waxay mas'uul ka noqon doonaan kharash kasta oo qareenka ku baxa oo ay geli karaan.

BEDDELKA – Dhedhexaadintu waxay dhici kartaa wakhti kasta – laga bilaabo bilawga khilaafka, kahor ama xilliga cabashada gobolka ama codsiga dacwad dhagaysiga caddaaladeed. Dhedhexaadintu ma faragelinayso xaqqa loo leeyahay in cabasho loo gudbiyo gobolka ama dacwad dhageysi caddaaladeed ama wakhiyada go'an ee cabashada gobolka ama dacwadaha caddaaladeed.



NEBRASKA

DEPARTMENT OF EDUCATION

Booqo mareegta: education.ne.gov/sped/mediation

Central Mediation Center – Kearney 308-237-4692/800-203-3452 info@centralmediationcenter.com centralmediationcenter.com	Mediation West – Scottsbluff 308-635-2002/800-967-2115 info@mediationwest.org www.mediawest.org
The Mediation Center – Lincoln 402-441-5740 info@themediationcenter.org www.themediationcenter.org	The Resolution Center – Beatrice 402-223-6061/800-837-7826 info@theresolutioncenter.org www.theresolutioncenter.org
Nebraska Mediation Center – Fremont 402-753-9415 nmc@nebraskamediationcenter.com https://nebraskamediationcenter.com	Concord Mediation Center – Omaha 402-345-1131 contact@concord-center.com www.concord-center.com

SPED

SPECIAL EDUCATION



Nebraska Department of Education Office of Special Education

500 S. 84th St., 2nd Floor

Lincoln, NE 68510-2611

(402) 471-2471

education.ne.gov/sped

SPED

SPECIAL EDUCATION